Portland Public Schools 2020 FALL Relmagining Education During the Pandemic

SU'AALAHA MAR WALBA LA ISWEYDIIYO EE KU SAABSAN DIB U FURISTA ISKUULADA XILIGA DAYRTA 2020

Xaggee ayaan ka heli karaan wararka ugu dambeeyey ee hadda kuna saabsan qorshayaasha Dayrta 2020 PPS?
Fadlan waxaad booqataan Bogayaga Dayrta 2020 wixii macluumaad ah ee ugu dambeeyey kuna saabsan sanad-dugsiyeedka 2020-21 (waxaad kale oo aad ku heli kartaa dhammaan lixda luqadood ee PPS la taageero). Iyada oo aan si joogta u cusbooneysiin doono bogga wixii macluumaad ah ee cusub, agabyo, fariimaha ku socda qoysaska iyo waxyaabihii kale ee muhiimka ah.

Waxbarashada qaabka masaafada guryaha lagu qaadanayaa miyey la mid tahay ama ay ka gedisanaan doontaa qaabkii waxbarashada ay ardaydu guryaha ku qaateen xilligii gu'ga?
Waxbarashadeena qaabka online ah waxaa loogu talogalay inay noqoto mid ka duwan tii hore ee xiligii gu'ga ay qaateen ardaydeenu. Waxa aanu ula socon doonaa si feejigan, tilmaamaha ay hadda daabacday Waaxda Waxbarashada Oregon ee ku saabsan waqtiga casharada, joogitaan/maqaanshaha ardayda, dhibcaha imtixaanada iyo qiimeynta. Kooxda Hoggaaminta Waxbarashadeena waxa ay soo saarayeen qorshaha waxbarashada masaafada ee guryaha lagu qaadanayo taasi oo dhammeystiran iyo raadinta dariiqooyin lagu horumarinayo waxbarashada masaafada guryaha lagu qaadanayo ee ardaydeena, shaqaalaha iyo qoysaska.

Ka gadaal labada todobaad ee ugu horeeya sanad-dugsiyeedka ee ardayda lagu xiro macallimiintooda iyo ardayda ay isku fasalka yihiin, iyaga oo noqonaya kuwa ku foogan qaabka ay wax u baranayaan iyaga oo la hadlaya la-taliyaashooda iyo shaqaalaha kale ee ku saabsan baahiyaha shucuurta bulshada iyo taageerida, ardaydu sidii ay ula socon lahaayeen jadwalkoodii todobaadkii ee caadiga ahaa iyo iyaga oo maalin walba ku xirnaan doono macallimiintooda; dhincaha imtixaanadooda iyo inay ka qeybqaadanayaan casharada ay macallimiintu ku gaarsiinayaan ardayda guryaha iyo in kale. Ardayda PPS waxa ay dareemi doonaa kor u qaadis macno leh oo lagu sameeyey waxbarashadii hore ee ay soo qaateen xilligii gu'ga.

Maxay noqon doontaa maalinta caadiga ee ardaydu?
Waxaa la soo saari doonaa muunad jadwalada todobaadlaha ah ee ardayda dugsiyada hoose,dhexe,iyo dugsiyada sarre iyada oo lala wadaagi doono sida ugu dhakhso badan sidii loo sii wadi lahaa wada shaqeynta hoggaamiyaasha iskuulada iyo macallimiinta. Hoos waxaa lagu soo bandhigayaa qorsheyaasha tilmaamaha ODE iyo qorshaha hadda ee dugsiyada degmada:

Laga bilaabo Bilowga Xannaanada(PK) ilaa ardayda Fasalada 8aad waxa ay si joogta ah ula kulmi doonaan macallimiintooda iyaga oo ka qeybqaadanaya waxbarasahada qeyb kasta casharada ay qaataan. Ardaydu waxa ay raaci doonaa jadwal la saadaali karo maalin walba oo leh fasaxyadii ay qaadanayeen xilliga quraacda, qadadda, iyo waqtiyadii jimicsiga oo ka mid ah maalintii jadwalkooda. Barashada shucuurta bulshada iyo taageeradoodu waxa ay ka mid noqon doonaan todobaadka iyada oo

ay ardaydu sii wadi doonaa inay helaan sidii ay ula xiriiri lahaayeen la-taliyaashooda dhinaca waxbarashada iyo baahiyaha kale ee ay u baahan yihiin in laga taageero.

Ardayda Dugsiyada Sarre waxa ay simistarkiiba qaadan doonaan afar fasal iyaga oo wax ka bedeli lagu sameyn doono fasalada ay ardaydu qaataan ee AP iyo IB sidoo kale ardayda kale ee u baahan taageerada dheeraadka ah. Ardaydu waxa ay la socon doonaa jadwalka gambaleelka oo online-ka ah iyaga oo maalin walba la kulmi doona macallimiintooda. Taageerida shucuurta bulshada waxa ay qeyb ka noqon doonaan jadwalka iyaga oo ardaydu sii wadi doonaan in ay fursad u helaan inay la xiriiraan la-taliyaashooda waxbarashada iyo baahiyaha taageerida caafimaadka xiska ee kale ama ay codsadaan.

Waa maxay gargaarka dheeraadka ah ee ay heli doonaan ardayda iyo qoysasku sidii loo xaqiijin lahaa inay guuleystaan xilligan dayrta?
Waxa aan la shaqeyneynaa saaxiibadayada shaqaalaha iyo saaxiibayada ku salaysan bulshada sidii agabyada loogu wareejin lahaa sidii ay u siin lahaayeen waxyaabo kala gedisan iyo taageerida kala gedisan ee la siinayo ardayda iyo qoysaskooda. Marka aan aqoonsano taageerooyinkaasi sanad-dugsiyeedka soo socda, waxa aan tixgalineynaa baahiyo kala gedisan ee ardaydeena, gaar ahaan kuwa xanuunkani safmareenka raadeeyey ee aan helin taageerida ay helaan ardayda da'doodo ah, ardaydeena madow, ardayda Asalka Maraykan iyo ardayda midabka ah. Waxa aan sidoo kale tixgalin siineynaa ardayda baahiyaha gaarka ah leh ee baranaya Luqada Ingiriiska iyo ardayda leh baahiyaha gaarka. Sidaas darteed, sahankii warcelinta qoyska iyo shaqaalaha, kooxihii gaarka ah, iyo faalooyinkii ay ku bixiyeen Shabakada xilligii dayrta 2020 ,waxa ay muhiim u ahayd qorsheyntayadii iyada oo aan sii wadi doono in aan idin weydiisano talladiina marka aan soo dhammeystirno dariiqooyinka aan isleenahay waan idiin gargaari karnaa.

La-taliyaasha iskuulada, gargaarayaasha bulshada iyo taageerayaasha kale ee ardaydu waxa ay ka shaqeyn doonaan sidii ay iskugu xiri lahaayeen qoysaska ardaydeedu leeyihiin baahiyaha gaarka inay helaan gargaarka ay u baahan yihiin. Waxa aan ka maqlnay qaar ka mid ah qoysaska ay shaqaaluhu kormeereen"jawi waxbarasho oo la isticmaalayo teknoolaji kala gedisan", waxbarashada masaafada ee guryaha lagu qaadanayo iyo habraaca caafimaad ee kale, wuxuu noqon doonaa caawiya sidii loo xaqiijin lahaa sii wadista waxbarashada bulshooyinka ardaydoodu helin gargaarkii ay u baahnaayeen.

Wixii kale ee gargaar dheeraad ah waxaan soo bandhigi doonaa xilliga dayrta, fadlan waxaad ogaataan in aan sii wadi doonaa in aan bixino cuntadii iyo in aad heshaan qalab teknoolajiga ah. Anaka oo la shaqeyneyna The Fund for PPS, waxa aan rajeyneynaa in aan sii wadno in aad taageerno qoysaska sidii ay heli lahaayeen internet, sidii aan bishii Maarso ee aan soo dhaafnay u siinay qoysaskii aan haysan internet caruurtooda hesho.

Dugsiyada Dadweynaha Portland miyey ardayda siinayaan kumbuyuutaro?
Xilligii gu'ga ee la soo dhaafay, PPS waxa ay ardaydii aan haysan kumbuyuutaro siiyeen kumbuyuutaro ay guryahooda ku isticmaalaan. Waxa aan sii wadi doonaa in aan daymino ardayda aan haysan kumbuyuutar, iyada oo aan idinla wadaagi doono faahfaahinta sidii aad u heli lahaydeen helitaanka

kumbuyuutaro degmada ay ardydu waxbarashada online guryaha ku qaataan xilliga dayrta. Waana sidii ay ahayd xilligii gu'ga ee la soo dhaafay ardaydii iyagu guryahooda ku haystay kumbuyuutar ay leeyihiin waxa ay isticmaali doonaan kumbuyuutaradoodaasi.

Waa maxay qaabka waxbarashada dijitalka ee PPS ay isticmaalayso xilliga dayrta?
Qaabka online PPS wuxuu noqon doonaa mid ay aqoonsadaan ardaydii waxbarashada ku soo qaadatay PPS-HD. Xannaanada Bilowga ah(PK) ilaa fasalada 5naad waxa ay ku qaadan doonaa Seesaw qaabka loo maareynayo waxbarashada fasaladooda; Fasalada 6aad ilaa 12naad waxa ay isticmaali doonaan Canvas. Macallimiintu waxay isticmaali doonaan Atlas fasalada waxbarashada fasalada muhiimka ah iyo agabyada waxbarashada. Waxaad macluumaadka ka heli kartaa ee ku saabsan qaababkayaga Bogga Agabyada Dijitilka.

Waxa aan isku dubarideynaa dhowr wacyigalin iyo hababka ay ardaydu u isticmaalayso iyo waliba in qoysasku ay baran lahaayeen iyaga oo ay u fududaaneyso qalabkan ay PPS isticmaalayso.

Sidee ayay noqoneysaa dhammaan marka la soo bandhigo Sebtamber? Miyaa ardaydayadu markiiba ay isticmaali karyaa marka la bilaabi fasalada iskuulka ?
Maalmaha ugu horeeya iskuulku kolay waxay noqon doontaa mid ka gedisan sanadkii hore. Ardaydu waxa ay labada todobaad ee ugu horeeya sanad-dugsiyeedka noqon doontaa waqti ay isku xirmaan macallimiintooda iyo ardayda ay isku fasalka noqonayaan, iyaga oo baranaya qaabka ay waxbarashada u qaadanayaan iyo qalabka ay isticmaalayaan iyaga oo la hadlaya la-taliyaashooda dhinaca waxbarashada iyo shaqaalaha kale ee ka taageera baahiyaha shucuurta bulshada. Macallimiinta waxa ay labada todobaad ugu horeeya waqtigooda ku qaadan doonaa casharo kulan ay kor ugu qaadayaan shaqadooda macallinimo.

PPS miyey bixin doontaa daryeelka xannaanada caruurta ee xilliga dayrta?
Waxa aan la shaqeyneynaa saaxiibadayada xannaanada caruurta iyada oo aan raadineyno dariiqooyin aan ku siinayno gargaar dhinaca waxbarashada iyo daryeelka caruurta ah. Ra'yi bixintii ay bixiyeen qoysaska PPS iyo shaqaalaha ee ku saabsanaa baahida in la taageero gargaarkani oo ah midka udub dhexaadka u ah qorsheyntayada; waxaan qorsheynay in aan u dudrno sahanka baahiyaha qoysaska PPS iyo shaqaalaha iskuulada todobaadka soo socda. Barnaamij kasta oo la bixiyo waa in uu waafaqsan yahay shuruudaha loo dajiyey xanuunka COVID-19 ee ah tirada isku imanaysa iyo goobta.